



Waxa ay ka yiraahdeen daryeelayaasha iyo hay'adaha Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn?

“Aad ayay u fududahay in la idin la shaqeeyo! Waad ku mahadsantihiin waxa aad qabataan oo dhan!”

“Shaqaalaha waa kuwo naxariis badan oo daryeel leh.”

“Waa kuwo talefoonka dad ku caawiya uguna naxriista. Qoysaska iyo macaamiisha waxaa ay si heersare ah uga hadlaan shaqaalaha.”

“Waxaa ay had iyo jeer ula dhaqmaan si xitiraam leh macaamiisha iyo qoyska.”

“Run ahaantii waxay jeceshahay waxqabadyada la bixiyo.”

“Waxqabadyada waa kuwo heersare ah. Waxaan jeclahay fasallada farshaxanka adeegsiga midabyada.”

“Waxay rabtaa in ay maalin walba tmaado!”

“Waxaan qabaa tani in ay tahay khayraad qiimo u leh macaamiishaada! Aad baad u mahadsan tahay!”

“Run ahaantii, barnaamijka la'aantiisa, waxaan aaminsanahay in aysan u suurtageli LAHAYN qayb ka mid ah macaamiisheyda in ay gurigooda joogaan. Waxaa intaa dheer, qayb ka mid ah daryeelayaasha in AYSAN awoodi lahayn in ay bixiyaan adeegyada CG.”

“Wayna la qoslaan. Oo ah wax aad muhiim u ah. Waxay dareensiin karaan raaxo marka ay la hadlayso.”

“Waa ay fiican yihiin marka aan u baahdo in aan kala hadlo shaqaalaha dhibaatooyinka/ arrimaha hooyadey haysta. Waxay ka baahi tiraan baahiyadeeda.”

Hadaad rabto macluumaad badan oo ku saabsan Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn fadlan la xiriir xafiiska degaankaaga ee Adeegyada Bulshada iyo Guriga ama booqo mareegtada Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn: www.dshs.wa.gov/adultdayservices

Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn

Adeegyada Maalinta ee Dadka Waaweyn waa barnaamijyo wakhtiga maalintii ah oo la kormeero.

Barnaamijyada waxay noqon karaan Daryeelka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADC) ama Caafimaadka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADH).



Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida



Transforming lives

DSHS 22-1731 SM (8/17) Somali

Daryeelka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADC)

ADC waxaa uu bixiyaa adeegyada aasaasiga ah ee loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba xaalado caafimaad ama naafonimo ee aan u baahnayn waxqabadyada ama adeegyada Kalkaaliso Diiwaangashan ama Daaweeye Baxnaanin ruqsad haysta.

- Adeegyada daryeelka shakhsi
- Adeegyo bulsho oo ah si la-talin ah
- Kormeerka caafimaad ee joogtada ah ee RN
- Hawlaha daaweynta guud
- Waxbarashada caafimaadka guud
- Kormeer iyo ilaalin
- Gargaar gaadiidka ah
- Gargaarka degdegga ah
- Waxqabadyada madadaalada/bulshada
- Cunto nafaqeysan iyo cunto fudud
- Waxaa uu ka dhimayaa saacadaha CARE 30 daqiiqo saacad kasta oo la imaado, ilaa laba saacadood maalintii



Kumaa xaq u leh ADC?

Qof:

- Hadda haysta qiimeyn CARE
- Ku qoran ama ku jira COPES, RCL, New Freedom, ama maalgelin kale oo la ansixiyey, iyo
- Leh baahi aan la daboolin oo loogu talagalay hal ama in ka badan oo ah adeegyada aasaasiga ee soo socda:
 - Adeegyada daryeelka shakhsi
 - Kormeer caafimaad oo la socda la-tashiga RN
 - Hawlaha daaweynta guud
 - Kormeer iyo/ama ilaalin
 - Ku nool meel guri dhexdiisa ah

Caafimaadka Maalintii ee Dadka Waaweyn (ADH)

ADH waxaa uu bixiyaa xanaaneyn xirfadeed iyo/ ama daaweyn baxnaanin marka lagu daro adeegyada aasaasiga ah ee laga bixiyo ADC.

- Dhammaan adeegyada aasaasiga ah ee ADC
- IYO
- Adeegyada xanaaneyn xirfadeed
 - Daaweyn xirfadeed: daaweynta jirka iyo baxnaanin shaqo, daaweynta baxnaaninta iyo dib-u-kabsashada, barashada, qiimeynta iyo daaweynta dadka hadalka ku adag, iyo qaybta daaweynta maqalka
 - Adeegyada la-talin taageero leh, maareynka kiiska
 - Gaadiid ayaa ku jira qiimaha maalin kasta
 - Wax isbeddel ah laguma sameyn karo saacaha CARE

Kumaa xaq u leh ADH?

Qof:

- Hadda haysta qiimeyn CARE
- Ku qoran ama ku jira COPES, RCL, new Freedom, ama maalgelin kale oo la ansixiyey
- Leh baahi aan la daboolin oo loogu talagalay hal ama in ka badan oo ah kuwan soo socda:
 - Xanaaneyn xirfadeed
 - Daaweyn xirfadeed
 - La-talin
- Ku nool meel guri-dhexdiisa ah, guri lagu xannaaneeyo waayeelka ama naafada ama guri qoys qaangaar ee aan bixin adeegga(adeegyada) loo baahan yahay